

# Macluumaadka Khidmadda iyo Lacag-bixinta

Woodland Centers waxay aqbali kartaa inta badan caymisyada, oo ay ka mid tahay Medicare iyo dhammaan Barnaamijyada Daryeelka Caafimaad ee Minnesota (Medical Assistance, Minnesota Care, iwm.)

## Lacag-bixinta Caymiska

Inta badan qorshayaasha caymiska caafimaadka waxay kafaalo qaadaan adeegyada caafimaad ee maanka/dhimirka. Siyaasadaha caymisku way kala duwan yihiin, markaas kaaga ka hubi macluumaadka dheefaha. Waan kaa caawin karnaa taas haddii loo baahdo.

Si aan biilka ugu dirno caymiskaaga, waxaanu u baahan doonaa kaarkaaga caymiska. Kaarkaaga wuxuu leeyahay macluumaadka aanu ubaahan doono:

- magaca shirkada caymiska
- lambarka aqoonsiga caymiskaaga
- magaca qofka la caymiyay iyo taariikhda dhalashada
- xiriirka aad la leedahay qofka la caymiyay haddii aanad adiga ahayn.

Markaad timaado Woodland Centers oo aad saxeexo oggolaanshaha aqbalaada adeegyada, waxay noo fasaxaysaa inaanu sheegasho u dirno shirkada caymiskaaga. Waxaad haysataa xulashada ah inaan biil loo dirin shirkada caymiskaaga, laakiin haddii aad doorato xulashadaas waxaa lagu weydiin doonaa inaad lacagta bixiso wakhtiga adeega.

## Xogta Biilka

Waxaad heli doontaa warbixin bileed/bishii, kaas oo muujin doona qadarka lagugu leeyahay marka laga jaro lacag-bixinta caymiska oo la sameeyo khidmad qiimo dhimis hadba baahida. Haddii aad bixiso wakhtiga adeega, waxaad helaysaa qiimo dhimis boqolkiiba 10.

## Xulashada Qiimo Dhimista Khidmada

Woodland Centers, waxay leedahay "cabir qiimo dhimis oo hoose" oo ku aadan inta badan adeegyadeeda ee dadweynaha degan degmooyinkan soo socda: Chippewa, Kandiyohi, Lac qui Parle, Meeker, Renville, and Swift. Haddii aad ku nooshahay mid ka mida degmooyinkan waxaad u qalmi kartaa qiimo dhimis khidmad.

Markaad timaado Woodland Centers si loo bilaabo adeegyada, shaqaalaheenu waxay kaala hadli doonaan u qalmitaankaaga qiimo dhimis khidmad. Si aad ugu qalanto qiimo dhimis khidmad, waa inaad keentaa cadaymaha qoyskaaga Dakhligiisa iyo xajmiga qoyska. Booqashadaada ugu horeysa, fadlan keen Cadaymo, sida canshuur celin dakhli, W-2, ama warqada mushaharka.

## Su'aalo?

Haddii aad qabto wax su'aalo ah, faldan kala xiriir Waaxda Biilasha ee Woodland Centers halkan 320-231-9159 ama lacag la'aan Minnesota gudaheeda halkan 1-800-251-0247. Fariimaha kusoo dir:

Woodland Centers  
Attention: Billing Department  
1125 SE 6th Street  
P.O. Box 787  
Willmar, MN 56201

Wixii macluumaad dheeri ah,  
Ka eeg boggeena internetka halkan  
[www.woodlandcenters.com](http://www.woodlandcenters.com)

